

Siyaasadda JI- Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha Ardayga

Xuquuqda aadanaha waa in dadka oo dhan ay u helaan si caadiga ah sababtoo ah waa aadane. Marnaba looma diidi karo insaaneyadda sababo la xiriira aqoonsiga aan joogtada ahayn ee ardaynimada; ardaydana ma aha in loo diido fursada ay wax kaga oggaanayaan ayna ugugu dhaqmayaan, bey'ada dugsiga, dabeecadaha xushmeynaya xuquuqda aadanaha, sharafta aadanaha, sinnaanta, iyo badbaadada.

Waxa sidoo kale muhiim ah xuquuqda mas'uuliyiinta dugsiga, ee raaca dhawrista dastuurka aasaasiga ah, si loo jiheeyo loona xakameeyo habdhaqanka ka jira dugsiyada. Kala duwanaanshaha u dhaxeeya xorriyadda ay ardayda filanayaan iyo xannibaadyada daruuriga ah ee ficiladooda ee qaanuunada ay dajisteen dugsiyada si loo sii-wado nidaamka wanaagsan waxaa isku keeni kara habdhaqanka habboon ee dhinaca labaduba.

Xuquuqda Ardayga

1. Ardayda waxay xaq u leeyihiin waxbarasho badbaadsan oo caddaalad ah ee khuseysa baahiyadooda iyo awoodooda.
2. Ardayda waxay xaq u leeyihiin in ay ugula dhaqmaan xushmad ardayda kale iyo shaqaalaha dugsiga.
3. Ardayda waxay xaq u leeyihiin in ay isku tagaan ayna fikradooda dhiibtaan ayagoo u marinaya hadal, qoraal, qaybin, xirashada calaamado muujinaya jinsiyad, dhaqan, ama qiimeyaal siyaasadeed sida badhan, maro ama bir yar oo lagu dhajiyo qofka dharkiisa, astaamo, iyo duubab gacamaha lagu xirto ama ayagoo u marinaya qaabka dharkooda ama is-qurxintooda, marka laga reebo in, maamulaha dugsiga, ama qofka loo magacaabay, laga yaabo in ay maamulaan muujinta fikradooda, haddii ay jirto xaqiiqo lagu saleynayo aaminsanaanta qaab fikradeed oo qeexan ee arday gaar ah uu u keenayo ama uu u keeni doonto arbushaad xoog leh ama waxqabadyada dugsiga ama ay ka kooban tahay halis caafimaad ama badbaado. Ardayda waxay sidoo kale xaq u yeelanayaan in ay iska daayaan in ay fikradooda ka muujiyaan waxqabadyadan ee ka soo biloowday ardayda.
4. Ardayda waxay xaq u leeyihiin in ay ka soo gudbiyaan ashtako ama cabasho maamulhooda dugsiga, qofka loo magacaabay, ama maaamulaha kale ee ku habboon, haddii ay dareemaan in xuquuqdooda lagu xadgudbay. Haddii mawduuca ashtakada ama cabashada uu yahay maamulaha dugsiga, ashtakada ama cabashada waa in laga sameeyaa kormeeraha guud ee waxbarashada ilaalinaya iyo/ama "Badbaadsan In La Sheego" "Safe To Tell".

Mas'uuliyadaha Ardayga

Inta uu joogo dhulalka dugsiga, xarumaha dugsiga, gawaarida ay soo aqbashay degmada, boosteejooyinka loocayimay baska dugsiga, ama dhacdooyin oo uu soo kafaalo-qaadey dugsiga, mas'uuliyadaha ardayga waa in ay noqdaan sida soo socota:

1. In uu caawimaad ka geysto sii-wadidda jawi guud oo sahlaya waxbarashada, iyo in uu xushmeeyo mabda'a ah in arday uusan ku lug yeelan waxqabad kasta ee carqaladeynaya ama halis gelinaya hawsha dugsiga iyo/ama faragelinaya xuquuqda waxbarasho ee kuwa kale.
2. In uu iska daayo wixii dhaqan ah ee lagu takoorayo ardayda kale ee ku saleysan qollada, qowmiyadda, lab ama dheddiga ahaan/jinsi, xaalka guurka, waddanka asal ahaan uu ka soo jeedo, naafonimo, da'da qofka, dookha galmo. ama aqoonsiga jinsi.

3. In uu xushmeeyo dhammaan xubnaha beesha dugsiga, oo ay ka mid yihiin ardayda kale, waalidiinta, iyo shaqaalaha degmada asagoo iska deynayo isticmaalidda luuqadda iyo falka muujinaya xushmad-daro.

4. In uu sare u qaado badbaadada jir ahaaneed iyo amniga shaqsi ahaaneed ee dhammaan kuwa kale asagoo iska daynaya dabecadda ku xadgubidda dadka, oo ay ka mid yihiin la dagaalidda ardayda, shaqaalaha, ama shaqsiyaadka kale.

5. In uu ugula dhaqmo hantida degmada dugsiga daryeelid iyo in uu ka fogaado xaddida ama waxyeeelaynta hanti kasta oo ay leeyihiin degmada, shaqaalaha, ama ardayda kale.

6. In si shaqsi ahaan ah uu isagaga fogaado, ama uusan ku dhiirinin kuwa kale keenidda, qaadidda, haysashada, ama isticmaalidda nooc kasta oo hub ah.

7. In uu ka fogaado isticmaalidda, haysashada, iibinta, gadashada, ama is-dhaafsashada aalkolo, maandooriye, daroogo, ama maadooyinka la xakameeyay, oo ay ka mid yihiin anabolic steroids iyo daawooyinka la isku qoro ama daroogooyinka kale ee halista ah iyo in uu ka fogaado iibinta ama is-dhaafsiiga maadooyinka ee ardayga waxay u dhigantaa sida daroogo ama maadooyinka la xakameeyay.

8. In uu soo xaadiro fasalada, wakhtigii la rabay imaado, iyo in uu isku dayo dhammeystirka shuruudaha qalin-jabinta sida ay tilmaameed Guddiga Waxbarashada.

9. In uu ku soo celiyo dhammaan hantida degmada dugsiga, ama uu ugu magdhabo dugsiga qiimaha badalka ah ee shay kasta, kahor inta uusan ka wareegin degmada, badelaaddaheerka fasalka degmada gudaheeda ah, ama qalin-jabinta.

10. In uu daacadnimo ugula dhaqmo shadaqa waxbarashada iyo dhammaan wax kala gadashada kale.

Siyaasadda JK iyo JK-R waa in ay xakamayso anshaxa ardayga.

La Ansixiyay: 17 Juun, 1999

La muraajaceyay: 15 Oktoobar, 2009